

Ku waalidka/mas'uuliyiinta ardayda iskoolka billaabaya iyo ardayda fasalka 1-aad ee iskoolka Tveita sanad dugsiyeedka 2019/2020

Oslo,

08.04.2020

## **WARBIXINTA DEEQ BOOS BAR AH OO BILAASH AH EE ISKOOOLKA FIRFIRCOONIDA [AKTIVITETSSKOLEN - AKS] EE FASALLADA 1-2. AAD SANAD DUGSIYEEDKA 2020/2021**

Dhammaan carruurta billaabaysa fasallada 1-aad iyo 2-aad ee iskoolka Tveita waxaa loogu deeqayaa boos bar ah oo bilaash ee laga siinayo iskoolka firfircoonida (AKS) sanad dugsiyeedka 2020/2021. Deeqdu waxay dhaqan gelayaa laga billaabo agoosto 2020-ka.

### **Nidaamka booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS**

- 12 saac ayaa maalin walba si isle'eg loo qaybin doonaa iskoolka kaddib, taas oo keenaysa in la helo wakhti fiican oo wax lagu qorsheeyo oo sare loogu qaado tayada deeqda
- toddobaadkiiba 2 maalmood marka uu iskoolku xiran yahay (fasaxa dayrta- iyo midka qaboobaha, fasaxa ciidaha masiixiga ee jul- iyo p ske iyo mid kasta oo ka mid ah toddobaadyada fasaxa xagaaga marka laga reebo bisha luuliyo, oo uu AKS xiran yahay).
- Maalmaha qorshaynta/maalmaha u dhexeeya laba maalmood oo fasax ah ee sanad dugsiyeedka wuxuu ardaygu joogi karaa maalin   ah (AKS ilaa iyo laba maalmood ayuu sanadkii u xirnaan karaa maalmaha qorshaynta iskoolka dartood)

Haddii aad doonaysaan in uu ilmuhu ka qaybqaato dhammaan deeqaha firfircoonida ee waxbarashada taageeraya, waxaad codsan kartaan boos buuxa oo qiimaha la dhimay.

### **Boos buuxa oo qiimaha la dhimay**

Qiimaha booska buuxa wuxuu ku xiran yahay dakhliga waalidka/mas'uuliyiinta ilmaha, wuxuuna noqon doonaa inta u dhexaysa 242 ilaa 1029 karoon bishiiba. Haddii uu ilmuhu boos buuxa haysto wuxuu AKS joogi karaa wakhtiga iskoolka ka hor iyo ka dib ba, iyo maalin walba marka uu iskoolku xiran yahay (marka laga reebo bisha luuliyo).

### **Ka-qaybqaadashada oo korodha iyo aqoonta luuqadda oo sare loo qaado**

AKS waa goob wax lagu barto halkaas oo ciyaar iyo waxbarasho sare loogu qaadayo horummarka maaddo iyo midka bulsho ee ilmaha. AKS wuxuu bixinayaa deeq is-raacsan taas oo iskoolka lala kaashanayo.

Manhaj iyo xeerka AKS, iyo hagaha Wadashaqaynta guriga-iskoolka ayay deeqdu ku salaysan tahay.

Hadafka laga leeyahay booska barka ah ee AKS waa:

- in la kordhiyo ka-qaybqaadashada AKS
- in sare loo qaado aqoonta luuqadda ee ardayga
- in sare loo qaado tayada AKS oo la hubiyo deeq isku mid ah

### **Sidaan ayaad boos uga codsanaysaa AKS**

Marka ay waalidku/mas'uuliyiinta ilmuhu AKS ilmo ku qorayaan waxay isticmaalayaan bogga internetka ee degmada Oslo [www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen](http://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen).

Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan iskoollada bixiya boos AKS oo bar ah oo bilaash ah ka eeg <https://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/gratis-deltids plass/>.

Iskoolka la xiriir haddii aad wax su'aal ah qabto.

Mahadsanidiin

**Aktivitetsskolen Tveita**